UNITED STATES DEPARTMENT OF LABOR

# Oggoow Xuquuqaha Ururkaaga



Ururadu waxay gacan ka geystaan ilaalinta caafimaadka, badqabka, mushaarka iyo amniga hawlgabka ee dadka Maraykanka ah ee shaqeeya. Shaqaalaha oo ay matalaan ururadu waxay dareemeen welwel la xariira ammaanka oo ku saabsan badqabka goobta shaqada iyo caafimaadka, xatooyada mushaarka, takoor iyo dhibaatayn, iyo xadgudubyada kale ee ilaalinta shaqaalaha. Ururadu waxay gacan ka geystaan dhaqangelinta xuquuqda sharciga ah ee shaqaalaha. Taageerida shaqaalaha maadaama ay isku dayayaan inay abuuraan ururo waxay caawisaa Waaxda Shaqada inay gaarto yoolkeeda. **Eeg ilaha hoose si aad u fahanto xaqa aad u leedahay inaad sameysato urur shaqaale ayadoon wax aargoosi ah lagugu sameynayn.**

## SIDA LOO SAMEYO URUR

## Tilmaamaha Talaabo Talaabada Ah Ee Sida Loo Sameeyo Urur

Shaqaalaha doonaya inay urur ku sameeyaan goobtooda shaqada waa inay la hadlaan dadka ay wada shaqeeyaan si ay u gaaraan afgarad ku saabsan arrimaha ay wajahayaan. Badanaa shaqaaluhu waxay sameeyaan sidaan waxayna u maraan abuurida guddi. Shaqaaluhu waxay la xiriiri karaan urur la aasaasay si ay taageero iyo hagis u helaan ama waxay isku dayi karaan inay abaabulaan ururkooda madaxbannaan.

Koox shaqaale ah oo doonaya inay abaabulaan urur shaqaale waa inay kasoo ururiyaan kaararka oggolaanshaha ururka/codsiga shaqaalaha ay wada shaqeeyaan si ay u muujiyaan taageerada samaynta urur shaqaale. Kaararka oggolaanshaha ururka waa dukumiintiyo shaqaaluhu saxiixaan ayna ku muujiyaan taageeradooda wakiilnimada ururka.

Marka iskuduwayaashu ay ka soo ururiyaan kaararka saxiixan ama codsiyada dadka ay wada shaqeeyaan, waxaa jira laba waddo oo la raaco si loo abuuro urur shaqaale:

### Isdiiwaangelinta aqlabiyada ah/Aqoonsiga ikhtiyaariga ah

1. **Inta badan shaqaalaha qaybta gorgortanka waxay saxiixaan kaararka/codsiga ay doonayaan inay matalaan ururka**
2. **Shaqaaluhu waxay ka codsadaan shirkadooda inay aqoonsato ikhtiyaarnimada ururka.**
3. **Hadii shirkadu ogolaato, ururku wuxuu noqonayaa wakiilka sharciga ah ee shaqaalaha ujeedooyin wadareed oo gorgortanka oowgood iyo dhinacyaduna bilaabaan gorgortan**
4. **Haddii loo shaqeeyuhu diido inuu aqoonsado ururka shaqaalaha, shaqaaluhu waxay u gudbin karaan codsi doorasho NLRB**

### Doorashada NLRB

1. **Ugu yaraan kaararkaaga/codsiyada oggolaanshaha ururka ha saxiixaan 30% kamid ah shaqaalaha kula shaqeeya**
2. **U gudbi cabasho racfaan ururka NLRB**
3. **Haddii ururka uu ku guuleysto 50% +1 oo cod, shirkadaadu waa inay si daacad ah uga gorgortamo xaaladaha shaqada**

**La xariir Xafiiska Guud ee NLRB si aad u hesho xog dheeraad ah**


## GARAAFIK:
## Faa'idada Ururka: Mushaar bixin

*Celcelis ahaan, shaqaalaha ururada kamid ah waxay helaan mushaar ka badan shaqaalaha aanan ururo lahayn.*

Shaqaalaha ururka guud ahaan: **+18%**

Ururka dumarka: **+22%**

Ururka shaqaalaha madoowga ah: **+20%**




*[fiiro gaar ah: waa inay jiraan nooc kamid ah waxyaabaha muuqaalka ah ee s addexda dhibcood ee xogta - waa inaysan noqon qoraal oo kaliya]*

## GARAAFIK:
## Faa'idada Ururka: Dheefaha

*Celcelis ahaan, shaqaalaha ururada kamid ah waxay helaan mushaar ka badan shaqaalaha aanan ururo lahayn.*

**Daryeelka caafimaadka:**
**95%** shaqaalaha ururada katirsan,
**68%** shaqaalaha aan ururada katirsanayn

**Dheefaha Hawlgabnimada:**
**94%** shaqaalaha ururada katirsan,
**67%** shaqaalaha aan ururada katirsanayn

**Fasaxa mushaarka lagu qaato:**
**90%** shaqaalaha ururada katirsan,
**75%** shaqaalaha aan ururada katirsanayn



*[fiiro gaar ah: waa inay jiraan nooc kamid ah waxyaabaha muuqaalka ah ee s addexda dhibcood ee xogta - waa inaysan noqon qoraal oo kaliya]*

**Marka laga imaado inay helaan mushaar fiican iyo dheefo wanaagsan, ururadu waxay faa'idooyin dheeraad ah u leeyihiin shaqaalaha:**

- **SINNAAN:** Ururadu waxay gacan ka geystaan joojinta farqiga mushaarka ee haweenka iyo shaqaalaha aan caddaanka ahayn
- **JADWALADA LA QIYAASI KARO:** Shaqaalaha ururada waxay inta badan xili hore helaan ogeysiiska jadwalada
- **BADQABKA:** Shaqaalaha ururada waxaa ku yar dhacdooyinka ay goobta shaqada kala kulmaan iyo waxyaabaha khatarta leh

## Kahortaga aargoosiga

Waxaad xaq u leedahay inaad ku biirto asxaabtaada si aad ugu doodaan xaaladaha shaqada idinkoo abuuraya urur ama qaadaya tallaabo kale oo muhiim ah. Waa sharci darro in loo shaqeeyuhu uu kaaga aargoosto adeegsiga xuquuqdaan.

Haddii aad aaminsan tahay in xuquuqdaada lagu xadgudbay, waa inaad sida ugu dhaqsaha badan ula xiriirtaa Guddiga Xiriirka Shaqada ee Qaranka (NLRB). Shirkadaada looma sheego doono cabashadaada. NLRB waxaa nagala xariiri karaa lambarkaan 1-844-762-NLRB (1-844-762-6572). Waxaa la heli karaa caawimaada luuqada Isbaanishka.

https://www.nlrb.gov/contact-us

## Iyadoo laga jawaabayo abaabulida ururka, loo shaqeeyaha ma awoodo:

- ✘ Cayrin ama hoos u dhig shaqaalenimo
- ✘ Soo rogida shuruudaha waraaqaha cusub si aad u ilaaliso shaqada
- ✘ Uma wareejin karto shaqaalaha goob kale
- ✘ La xariir laamaha ammaanka, oo ay kujirto ICE
- ✘ Inuu yareeyo mushaarka, saacadaha, ama dheefaha
- ✘ Kam dhigi karo shaqada mid aad u adag ama ka fudud - sida badelista jadwalka shaqada, diidmada saacadaha dheeraadka ah, ama kala saarista shaqaalaha
- ✘ Shaqaalaha uguma hanjabi karo waxyaabahaan

## Shaqaalaha soo Galootiga ah waxay xaq u leeyihiin xuquuqaha abaabulka

Inta badan shaqaalaha, oo ay kujiraan shaqaalaha soogalootiga ah, waxay xaq u leeyihiin inay abuurttaan urur ay ku midaysan yihiin ilaalinta Guddiga Xidhiidhka Shaqaalaha Qaranka (NLRB). Mid kamid ah xuquuqahaas ayaa ah xaqa aad u leedahay inaad ka hortagto aargoosiga. Aargoosiga ku salaysan sharciga socdaalka waxa kamid noqon kara:

- Hanjabaad ah inaad wacdo maamulka socdaalka
- Codsiga dukumiintiyada xaqiijinta shaqada ee I-9 ee cusub ama lambarka Amniga Bulshada
- Dadaallo lagu wacaayo booliiska oo laga qaybgelinaayo maamulka socdaalka Joojinta
- Shaqo Joojinta.

Guddiga Hawlaha Shaqaalaha ee Qaran shaqaaluhu wax kama waydiin doonaan xaaladaada socdaalka inta lagu jiro baaritaanka ama si ay u caddeeyaan xadgudubyada Sharciga Xiriirka Shaqada Qaranka. NLRB waxay ka shaqayn doontaa sidii ay shaqadaada dib ugu heli lahayd aadna dib ugu heli lahayd mushaarka aad waysay. Haddii shirkadaadu ay caddeyso inaan laguu oggolayn inaad shaqeyso, heerka socdaalka ayaa xaddidi karaa waxaad hesho haddii shirkadaadu ay si sharci-darro ah kaaga aarguto, laakiin NLRB waxay raadin doontaa xalal kale waxayna kala shaqayn kartaa hay'adaha socdaalka si ay u caawiyaan shaqaalaha lagu xadgudbay xuquuqdooda shaqada.